Ka wada Shaqaynaya si loo Xaqiijiyo Guusha Ilmahaaga

Ma Ogeyd?

- Ardayda da'kasta ah ee dugsiga ma maqnaada laba maalmood oo kaliya bishii (ama 17 maalmood sanadkii) ay u badan tahay in uu dhib u dhac ku yimaado isla markaana ayna u badnayn in ay qalib jabiyaan.
- Macno weyn kuma fadhiyo haddii maqnaanshuhu yahay mid cudurdaar leh ama aan lahayn ama haddii maqnaanshuhu marmar dhaco ama uu yahay mid xiriir ah.
- Imaanshaha dugsigu waa mid xataa muhiim u ah carruurtaada. Carruurta dhigata dugsiga barbaarinta carruurta "kindergarten" ama fasalka koowaad ee maqnaata maalmo tiro badan waxaa ku adkaada sida loo barto wax akhriska.

Maqnaanshaha qaarkood waa mid aan la baajin karin, laakiin qaar kale waa laga hortagi karaa.

Taageero loogu talagalay qoyskaaga ayaa la helayaa.

Dugsiga ilmahaaga ka fiiri si aad u aragto sida ilmahaagu yahay iyo sida loo helo taageero.

Marka lagu daro macalimiinta, dadka wax caawin kara waxaa ka mid ah:

- La taliyayaasha Dugsiga
- Maamulayaasha Goobta SUN Community School (Dugsiga Bulshada SUN)
- Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga ku-Salaysan iyo Xarumaha Caafimaadka Degaanka—Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga ku-Salaysan ee 13naad waa xarumo caafimaad oo adeegyo buuxa laga helo kuwaasi oo u adeega dhammaan ardayda ka tirsan Degaanka Multnomah. www.multco.us/SBHC

Waxaad booqataa website-yadan wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida loo taageero ilmahaaga

www.multco.us/sun/attendance

www.absencesaddup.org

Tallaabooyinka Aad Qaadi Karto Si loo Xaqiijiyo Guul la Gaaro

- Deji wakhti joogto ah oo sariirta la aado iyo caado joogto ah oo subaxdii la qabto.
- Sii diyaari dharka isla markaana alaabta habeen ka hor ku sii rid boorsooyinka dugsiga.
- Waalidiinta kale la wadaag talooyin la xiriira aadida dugsiga ee wakhtiga loogu talagalay.
- Deji qorshe bedel ah oo dugsiga lagu aadayo haddii ay wax kale yimaadaan.
- Daryeel caafimaad ka hel Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga ku-Salaysan si loo yareeyo wakhtiga laga baxayo fasalka.
- Weydiiso in ay xubnaha ka tirsan qoyska, deriska ama waalidiinta kale ku caawiyaan haddii aad taageero uga baahan tahay dhigida ama qaadida ilmaha.
- Haddii ay suurtagal tahay, balamaha caafimaadka qabso maalmaha uu dugsigu xiran yahay.
- Haddii ilmahaagu ka walaacsan yahay bilaabida ama aadida dugsiga, kala hadal maamulaha, agaasimaha, macallinka, dhakhtarka ama waalidiinta kale si aad hesho talo.

Marka ay Tahay In Aad Ilmahaaga Guriga Ku Hayso

Ilmahaaga waa in uu guriga joogtaa/joogtaa haddii isagu/iyadu:

- Leeyahay/leedahay xumad, iyada oo aan daawo la qaadan, ka saraysa qiyaastiii 100.5 degrees
- Mantagayo/mantagayso ama shuban leeyahay/leedahay
- Leeyahay/leedahay indho casaan/guduud xigeen ah isla markaana dusha ka adag